



XOGTA KOOBAN EE OGAYSIISKA XEERARKA SIRTA

Sirta xogtaada caafimaadka ee Dhowrsan, oo sidoo kale loogu yeero diiwaankaaga caafimaadka, ayaa aad muhiim ugu ah Dental 3. Waxaa jira dhawr sababood oo aan ugu baahan karno xogtaan si aan u siino dadka kale. Ogaysiisnaan Xeerarka Sirta ayaa lagu siinayaa si laguugu sheego qaababka aan u adeegsan karno aana u shaacin karno xogta kasoo baxda diiwaanka caafimaadka. BOGGAAN MA BIXINAAYO XOGTA BUUXDA EE OGAYSIISKA XEERARKA SIRTA. Ogaysiiska buuxa ayaa la heli karaa marka la codsado. Marka lagu daro dadaalkeena joogtada ah ee difaacida xogtaada, waxaa jira waajibaadka qaar oo sharciga federaalku na amraayo. Mid kamid ah waajibaadkaas waa inaan ku siino Ogaysiisnaan.

WAXYAABAHA LAGU SHARXAY NUQULKA BUUXA EE OGAYSIISKA XEERARKA SIRTA

- **Sida aan u adeegsan karno una shaacin karno xogtaada sirta anagoon wax oggolaansho ah kaa qaadan:**
 - Si aan kuu daawayno
 - Si aan u helno qarashka adeegyada aan ku siinay
 - Si aan warbixinno u siino wakaaladaha federaalka, gobalka, iyo kuwa maxaliga ah iyo ururada kale marka sharcigu nagu amro warbixintaas
 - Inaan warbixinno ka bixino ama xog shaacino sababo la xariira caafimaadka dadwaynaha, badqabka, iyo/ama cilmi baaris.
- **Sida aan cid kale u siin karno xogtaada adoon noo fasixin, laakiin keliya waa haddii aan ku siino fursad aad ku diido:**
 - Inaan la wadaagno xogtaada qoyska, saaxiibada, iyo dadka kale ee qaybta ka ah daryeelkaaga lacagta adeegyada aad hesho
 - In aan xog ka bixino haddii ay masiibo dhacdo si aan ugu sheegno qoyskaaga iyo asxaabtaada meesha aad joogto iyo xaaladaada guud.
- **Sida aan u adeegsan karno una shaacin karno xogtaada caafimaadka keliya markaad noo fasaxdo shaacinnada aan ahayn kuwa kor lagu xusay.**
- **Xaquuqdaada sharci ee aad ka helayso sharciyada sirta ee federaalka waxaa ku jira xaqa aad u leedahay:**
 - Inaad codsato inaad aragto aadna nuqul kala baxdo xogtaada caafimaadka
 - Inaad codsato in xogta khaldan ama kala dhiman ee ku jirta diiwaankaaga caafimaadka la saxo
 - Inaad codsato liiska meelaha aan u dirnay xogtaada ilaa in lagu diray maahee oggolaanshahaaga, sabab lacag bixin, daawayn, ama shaqooyinka Daryeelka Caafimaadka
 - Inaad codsato inaan yarayno xogta aan u adeegsano ama u shaacino sababo daawayn, lacag bixin, ama shaqooyinka daryeelka Caafimaadka ah, ama xogta aan la wadaagno xubnaha qoyska iyo dadka kale ee qaybta ka ah daryeelkaaga. Qasab naguma ahan inaan oggolaano codsigaaga
 - Inaad codsato inaan kugulasoo xariirno qaab qarsoodi ah
 - Inaad codsato nuqulka waraaqda ah ee Ogaysiiska Xeerarka Sirta markaad doonto
 - In lagu sheego haddii la jabsado xogta caafimaadka ee Dhowrsan, ee amaankaadu uusan sugnayn
 - Inaad soo gudbisoo cabasho haddii aad aaminsan tahay in xaquuqdaada sirta la jabiyay
 - Inaad jeebkaaga ka dhiibto qarashka buuxa ee daryeelka caafimaadka ama adeegga aadna joojiso shaacinta daryeelkaas ama adeeggaas gaarka ah oo loo sheego shirkadaada caymiska